Jamhuuriyadda Somaliland    Republic of Somaliland

# Legal Aid Code of Conduct

# XEER- ANSHAXEEDKA ADEEGA KAALMADDA SHARCI

Ministry of Justice & Judiciary Affairs
HARGEISA, SOMALILAND

**28/09/ 2013**

Ka dib markii la soo gabogabeeyey hawlaha lagu dhamaystirayay xeer anshaxeedka adeega kaalmada sharci, agaasimayaasha bixiyayaasha adeega kaalmada sharci iyo Unugga Adeegga Kaalmada Sharci ee Wasaaradda Cadaladda waxay isla qaateen saxeexeena ansixinta xeerkan, waana kuwan:

| S/no | Magaca | Xafiiska | Xilka | Saxeexa |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Maxamed Abokor Maxamed | Xarunta Adeega Kaalmada Sharci ee Jamacadá Hargeisa | Agaasime | |
| 2. | Jaamac Cali Ismaaciil | Xarunta.Adeega Kaalmada.Sharci ee SOLLA | Agaasime | |
| 3. | Xassan Cali Ismaciil | Xarunta Addeegga Kaalmada Sharci ee Jmacada Camuud | Agaasime | |
| 4. | Raaqiya Yuusuf Ibrahim | Xarunta Adeega Kaalmada Sharci ee SWLA | Agaasime | |
| 5. | Khadar Cali Xassan | K/S xidhiidhinta Adeegga Kaalmada Sharci ee Wassaaradda Cadaaladda | Agaasime | |

Taariikhda: 28/09/2013

# XEER-ANSHAXEEDKA KAALMADA SHARCIGA
# QAYBTA KOWAAD

## HORDHAC

### 1.1. Arar

**Iyadoo la aqoonsan yahay:** mabaadi'da Caalamiga ah ee Xuquuqaha Aadamiga ee u sinnaanta sharciga, xaqa in qofku dembi-laawe yahay ilaa ay maxkamd horteed kaga cadaato dembiilenimadiisa, xaqa garsoor cadalad ah oo dadweynaha u furan oo ay qaado maxkamad madax-banaan oo dhexdhexaad ah, iyo dhammaan xuquuqaha lagama maarmaanka u ah is difaaca qof kasta oo lagu eedeeyo fal-dembiyeed;

**Maadama:** mabaadi'da iyo habraacyada marin-u-helista kaalmo sharci ee loogu baahan yahay nidaamka maamulka dacwadaha ciqaabta ah ee ka soo baxay Qaramada Midoobey sannadkii 2012, uu xusay in helista kaalmo sharci ay lagama maar maan u tahay cadaaladda, aadaminimada iyo wax-ku-oolnimada nidaamka ciqaabeed ee ku salaysan sarreynta sharciga;

**Maadaama:** Dastuurka Somaliland dammaanad-qaaday xuquuda caalamku isku waafaqay ee qof kastaa u leeyahay in uu qabsado qareen iyo in uu helo adeeg sharci oo bilaash ah haddii anuu eedeysanuhu awoodin in uu qareen qabsado;

**Maadaama**: Xeerka Nidaamka Garsoorka Soomaaliland dammaanad-qaadey xaqa lama-tabtaanka ah ee helista qareen difaac ee qof kasta oo lagu eedeeyo fal-dembiyeed lagaga xukumi karo xadhig dhan 10 sano ama ka badan, xabsi daa' in amaba dil;

**Maadaama:** Habka Xeerka Ciqaabta ee Somaliland xeeriyay xaqa eedesanuhu u leeyahy in uu helo qareen ama qareenno difaaca; in ay waajib ku tahay maxkamadaha in ay u qabtaan qareen bilaash u difaaca eedeysanaha aan isagu qareen qabsan; iyo waliba xaqa eedeysanaha xidhani u leeyahay in uu si xor ah ula kulmo ulana tashado qareenkiisa inta ay socoto iyo dhammaamba marxaladaha kala duwan ee dacwadiisa.

**Maadaama:** Xukuumadda Somaliland garwaaqsan tahay in, si qof kasta loogu dhawro xuquuqaha Aadamaha iyo xoriyaadka lama-taabtaanka ah ee uu leeyahay, ay lagama maarmaan ka dhigeyso in uu qofku fursad u helo qareenno madax-banaan oo siiya adeeg kaalmo sharci oo wax-ku-ool ah.

**Iyadoo la aqoonsan yahay:** in ururrada mihnedleyaasha sharcigu leeyihiin door iyo kaalin weyn oo ay ka qaataan sugidda halbeegyada iyo anshaxa xirfadeed, fidinta adeegyada sharci ee qofku u baahan yahay; iyo weliba ka-gacan-siinta dawladda iyo hay'adaha kale sidii loo sugi lahaa caddaaladda iyo ilaalinta danta ummadda.

**Hawl-wadeen kaalmo sharci:** Garyaqaannada iyo caawiyeyaasha ka hawl-gala bixinta adeegga kaalmada sharciga;

**Dano is-khilaafsan:** dano is-khilaafsani waxay jiraan marka qof ama urur uu dano ka leeyahay meelo kala duwan, oo horumarinta dan ka mid ahi ay nusqaaminayso u heellanaanta horumarinta tu kale;

**Macmiil:** qofka adeeg kaalmo sharci loo qabanayo;

**Wasaarad:** Wasaaradda Cadaaladda;

**Unugga kaalmada Sharciga:** Unugga ka tirsan Wasaaradda Cadaaladda ee qaabilsan isu-duwidda hawlaha adeegyada kaalmada sharciga;

**U-qalmid:** buuxinta shuruudaha loo dejiyey qofka la siinayo kaalmada sharciga.

## 1.3. Magaca Xeer-anshaxeedka

Xeer-anshaxeedkan waxaa loogu yeedhayaa "Xeer-Anshaxeedka Kaalmada Sharciga ee 2013"

## 1.4. Dabbaqaadda Xeer-Anshaxeedka

Xeer-Anshaxeedkan waxa lagu dabbaqayaa dhammaan bixiyeyaasha adeegyada kaalmada sharciga oo ay ku jiraan hay'adaha, ururrada, xarumaha, shirkadaha iyo maamul kasta oo kaalmo sharci bixiya, qareennada kaalmada sharciga iyo caawiyeyaasha kaalmada sharciga.

## 1.5. Ujeeddada Xeer-Anshaxeedka

Ujeeddada Xeer-Anshaxeedkani waa in la dejiyo hab-dhaqammada iyo mas'uuliyadaha looga baahan yahay hay'adaha iyo hawl-wadeennada kaalmada sharciga, tallaabooyinka anshax-marineed ee lagu mudanayo gefefka mas'uuliyadeed iyo qaabka iyo hab-raaca loo anshax-marinayo.

## 1.6. Maba'diida guud ee Xeer-Anshaxeedka

Mabaad'ida guud ee hab-dhaqanka laga filayo hay'ad kasta iyo hawl-wadeen kasta oo kaalmo sharci in ay sal u noqdaan waxa ka mid ah:

**b. Ku-wajahnaan macmiil (Client focussed)**

Hay'ad kasta iyo hawl-wadeen kasta oo kaalmo sharci waa in hab-dhaqankooda adeeg- bixineed iyo mas'uuliyaddooda xil-gudasho ku wajahan yihiin ilaalinta danta macmiilka adeegga loo qabanayo

# QAYBTA LABAAD
# HAY'ADDA KAALMO SHARCI

## 2.1 Mas'uuliyadda hay'adda kaalmo sharci

Hay'adda kaalmo sharci bixinaysa waxaa laga rabaa mas'uuliyadahan soo socda:

**b. Ilaalin Heer-Beegyo Tayo Adeeg Ee Siyaasadda Kaalmada Sharci**
Hay'adda kaalmada sharciga ama waaxda ama qaybta kaalmada sharciga u qaabilsan hay'ad, waxa saaran mas'uuliyadda ilaalinta heer-beegga tayo ee adeegyada kaalmada sharciga ee hawl-wadeennadeeda kaalmada sharcigu bixinayaan, gudashada mas'uuliyadahaas oo ay u marayso hab-dhaqanadan soo socda:

**t. Xulasho hawl-wadeenno aqoon iyo waaya'aragnimo leh:**

Si loo xaqiijiyo soo-bandhigidda adeegyo tayo leh oo gaadhsiisan heer-beegyada loo dejiyey adeegyada kaalmada sharciga, maamulka ama hoggaanka hay'ad kasta oo kaalmo sharci waxa waajib ku ah in ay u xushaan hawl-wadeennada kaalmada sharci ee ay ka mid yihiin qareennada kaalmada sharciga iyo caawiyeyaasha qareen (paralegals) aqoon-yahanno sharci oo leh kartida, aqoonta iyo waayo'aragnimada ay ku hanan karaan adeeg-bixintaa.

**b. Kormeer, la xisaabtan, qiimayn & gacan-siin hawl-wadeen:**

Maamulka hay'adda kaalmada sharciga waa in ay karti u leeyihiin kormeerka, la xisaabtanka iyo qiimaynta hawl-wadeennadeeda kaalmada sharci, isla markaan ay si joogto ah ugu sameeyaan kormeer, dabagal iyo qiimayn, si ay adeegyada kaalmo sharci ee ay soo bandhigayaan u noqdaan kuwo tayo leh oo gaadhsiisan heer-beegyada tayo ee la dejiyay, sidoo kalena waa in ka gacan-siiyaan hawshooda, waxna kala qabtaan caqabadaha ka horyimaada. Si mas'uuliyaddan loo hirgeliyo waxa ku waajib ah maamullada hay'adaha kaalmo sharci:

i. In ay ku sameeyaan hawl-wadeennadooda kormeer xilliile ah ugu yaraan bishii hal mar;
ii. In ay la xidhiidhaan hay'adaha shaqo-wadaagta la leh ee aagagga ay ka hawl-galaan, sida Maxkamadaha, xafiisyada Xeer-ilaalinta, saldhigyada Booliska, xabsiyada iyo hay'adaha kale xidhiidhka shaqo ka dhexeeyo si ay u ogaadaan waxqabadka iyo wada shaqaynta ay la leeyihiin hawl-wadeennadooda kaalmada sharci;
iii. In ay abuuraan nidaan warbixin oo sugan oo ay hawl-wadeennadoodu u raacaan gudbinta warbixinahooda;
iv. In ay u kuur-galaan oo xaqiijiyaan runnimada warbixinaha y soo gudbiyaan hawl-wadeennadoodu, isla markaana qiimeeyaan oo kula xisaabtamaan;
v. In ay si xilliile ah u sahamiyaan una qiimeeyaan raadaynta waxtar ee ay bulshada ku yeelatay adeegyadooda kaalmo sharci;

i. In ay lahaadaan nidaam cabasho oo macaamiishu uga caban karto hawl-wadeennada kaalmada sharci;
ii. In ay inta suuragalka ah ku wargeliyaan macaamiisha nidaamka iyo hab-raaca cabasho;
iii. In cabasho kasta la dhegeysto oo macmiilka laga qanciyo ama wada-hadal lagu xallilo;
iv. In cabashooyinka wada-hadal iyo qancin ku dhamaan waaya la baadho go'aanna laga gaadho;
v. In cid kasta oo ku qanci weyda go'aanka hay'adda fursad loo siiyo loona fududeeyo in ay ka sii caban karto go'aanka hay'adda.

**r. U-hoggaansan sharci:**

Hay'adaha kaalmada sharciga waxay mas'uul ka yihiin ku-shaqaynta, u-hogaansanka iyo ku-dhiirrigelinta hawl-wadeennadooda ku-dhaqanka Siyaasadda Qaran ee kaalmada sharciga, xeerka kaalmada sharciga, Xeer-nidaamiyeyaasha, hageyaasha, heer-beegyada, Xeer-anshaxeedka Kaalmada sharciga la xidhiidha iyo xeerarka kale ee dalka.

**s. Sugnaan iyo hufnaan warbixineed**

Hay'adda kaalmada sharci waxay mas'uul ka tahay sugnaanta iyo runnimada warbixinada ay soo bandhigayso ee ku saabsan wax-qabadka hawl-wadeennadooda iyo dhacdooyinka dacwadeed ee ay ka warbixinayaan, iyagoo ka fogaanaya buunbuunin, ka bad-badin, ka been sheegid, xaalad abuur iyo arrimaha la xidhiidha ee xaqiiqda ka fog, si waxyaabahaa looga fogaadana waxa looga baahan yahay maamullada hay'adaha kaalmada sharciga:

i. In ay hayaan, xafidaan oo ilaaliyaan dhakumenti qeexan oo muujinaya dhamaan adeegyada ay bixiyeen oo ay ku jiraan, balse aan ku koobnayn:
   b) Diiwaanno tilmaamaya dadka ay talada sharci siiyeen;
   t) Foomamka waraysiga ee macaamiisha ay la kulmeen;
   j) Galalka dacwadaha ee macaamiisha ay Maxkamad ku meteleen;
   x) Wakaaladaha macaamiisha dacwad metelaadda u wakiishay;
   kh) Tallaabooyinka ay ka qaadeen iyo qoraallada ay ka qoreen;
   d) Go'aammada iyo xukummada ka soo baxay;
   r) Warbixinaha xilliilaha ah ee hawl-wadeennadu u soo gudbiyaan;
ii. In ay warbixinadoodu ku salaysnaadaan xogo la rumaysan karo;
iii. In ay hubiyeen ama xaqiijiyeen dhacdada ama wax-qabadka marka loo baahan yahay.

viii. In aanay sheegan, warbixintoodana ku darsan qabashada hawl hay'ad kale oo kaalmo sharci qabatay;

ix. In aanay u adeegsan hawl-wadeen u shaqeeya hay'ad kale oo kaalmo sharci ama u diran hawl ama adeeg kaalmo sharci oo la mid ah hawsha uu u hayo hay'adda kale ee kaalmo sharci.

## 2.2 Tallaabooyinka anshax ee ka dhalan kara u-hoggaansanaan-la'aanta waajibaadyada qaybta 2[aad]

Hay'ad kasta oo kaalmo sharci oo ay ku cadaato in ay xadgudubtay tilmaamaha qaybta 2[aad] ee Xeer-anshaxeedkan waxay mudanaysaa:

b) Marka ugu horraysa ee ay hal waajibaad ku gefto waxay mutaysanaysaa canaan qoraal ah, iyadoo la siinayo tilmaamo iyo waqti ku habboon oo ay ku saxdo gefkeeda ama dhalliilaheeda; haddii ay marka ugu horraysaba isku mar ku xadgudubto in ka badan hal waajibaad waxay mutaysanaysaa digniin qoraal ah;

t) Mar labaadka ay ku gefto hal waajibaad, waxay mutaysanaysaa digniin qoraal oo ay weheliso tilmaamo iyo waqti ay ku saxdo ama ku daboosho dhalliilaha looga digay;

j) Marka saddexaad ee ay ku gefto hal waajibaad ama ka badan, amaba marka la fulin waayo tilmaamihii weheliyey digniinta waxa lagu ganaaxayaa hay'adda kaalmada sharciga ganaax aan ka badanayn 5,000,000 Shilin Somaliland ah iyada oo loo eegayo heerka gefka;

x) Marka afraad ee ay ku gefto hal waajibaad ama ka badan, amaba la fulin waayo tilmaamihii weheliyey ganaaxa ama ganaaxii marka aan cabasho ama dib u eegis laga war-sugeyn, hay'adda kaalmo sharci waxay mudanaysaa ganaax shan ilaa todoba malyan ah oo loo eegayo culayska gefka;

kh) Marka shanaad ee ay ku gefto hal waajibaad ama ka badan, amaba la fulin waayo tilmaamihii weheliyey ganaaxa ama ganaaxa laftiisa, marka aan cabasho ama dib u eegis laga war-sugeyn, waxa hay'addaa kaalmo sharci:

i. Hawsheeda kaalmo sharci lagu xaddidayaa qaybo ama noocyo cayiman oo adeegyada kaalmada sharciga ka mid ah ama goobo cayiman in ay adeegyada kaalmo sharci ka fuliyaan ama;

ii. Waxa laga hakinayaa heshiisyada dhaqaale ee kaalmada sharciga.

d) Labada tallaabo ee lagu sheegay xubinta (kh) intaan la go'aansan waxa lagala tashanayaa Wasiirka Cadaaladda iyo hay'adaha bixiya dhaqaalaha mashaariicda kaalmo sharci ee hay'adaasi fulinayso, waxaana la tixgelinayaa wixii heshiis fulin mashruuc kaalmo sharci ee xilligaa socda.

x. In uu dhiirrigeliyo, u ololeeyo, caawiyo, kana qayb qaato hirgelinta Cadaaladda, xaq-soorka gar-qaadista iyo ilaalinta xuquuqaha iyo xorriyadaha aasaasiga ah ee qofka sharcigu u dammaanad-qaaday;
xi. In uu sida ugu habboon u maamulo, u ilaaliyo, una xafido gal-dacwadeedyada macaamiisha;
xii. In qofka uu adeegga kaalmada sharci u fidinayo aanu weydiin, ku riixin, ku cadaadin bixin ama ballan-qaad hantiyeed ama faa'iido kale, amaba aanu uga faa'iidaysan xidhiidho sharci daro ah oo uu la yeesho;
xiii. In uu kula dhaqmo ixtiraam iyo qaddarin Maxkamadda iyo dhinacyada kale ee dacwadda, sida saraakiisha Xafiiska Xeer-ilaalinta, baadheyaasha, qareennada kale, maragyada, khabiirrada, weliba dhinaciisa ku dhiirrigeliyo in uu ixtiraam kula dhaqmo garsooraha;
xiv. In uu ilaaliyo ballamaha dhegeysiga dacwadaha uu macmiilkiisu darafka yahay.

## 3.3 Mas'uuliyadaha qareenka kaalmo sharci ee gaarka u ah dacwadaha ciqaabta

Dadka Dacwaha ciqaabta u xidhan, ha lagu tuhmo ama ha lagu eedeeyo ama ha loo xukumee, marka aanay qabsan karin qareen difaac, waxay noqonayaan dadka ugu nugul ee ugu baahida badan kaalmada sharciga, haddii aan heshiiska Qareenka kaalmada sharci ama nooca ruqsadda ee qareenku aanay ka reebeyn dacwadaha ciqaabta, qareenka kaalmo sharci xil gaar ah iyo mas'uuliyad gaar ah ayaa ka saaran dadkaa nugul ee xorriyaddoodu ka maqan tahay, waxaana qareen kasta oo kaalmo sharci oo waajibkiisa ay ku jirto difaaca iyo metelaada dacwadaha ciqaabta ku waajib ah:

i. In uu xil gaar ah iska saaro dacwadaha ciqaabta ah, gaar ahaan kuwa xorriyaddooda laga qaaday, mudnaan gaar ahna siiyo haweenka, carruurta, qaxootiga, barakacayaasha, naafada, dadka la hayb-sooco, kuwa HIV/AIDS-ka la nool, kuwa da'da weyn iyo kuwa dembiyada culus loo haysto;
ii. In uu karti iyo waayo-aragnimo u leeyahay nooca dacwadda;
iii. In macmiilka xidhan uu metelo dacwaddiisa isla marka la xidho ama xilliga ugu horreeya ee suuragalka ah ee marxalada dhegeysiga ka hor;
iv. In uu abuuro oo dhiso kalsoonida iyo is aaminka macmiilka;
v. In uu dhegeysto macmiilka oo uu xidhiidh joogto ah oo dhow iyo xog-is-dhaafsi uu la sameeyo;
vi. In uu u ilaaliyo macmiilka dhammaan xuquuqaha xaq-soorka gar-qaadista;
vii. In uu si waxtar leh u metelo macmiilka uguna diyaariyo difaaciisa;
viii. In uu inta suuragal ah dedejiyo dacwadda macmiilka xidhan, ballamahana ilaaliyo;
ix. In uu racfaan u qaado macmiilka uu metelayo ee xukun ku dhaco, mar kasta oo ciqaabtu culus tahay, sida ciqaab dil ah, xabsi daa'yin ama xadhig toban sano ka badan iyo mar kasta oo aanu ku qancinxukunka lagu ridey;
x. In uu dabagalo oo xaqiijiyo gudbinta galka macmiilka uu racfaanka u qaaday;
xi. In uu sii wado dacwadda macmiilka uu racfaaanka u qaaday ama uu ugu gudbiyo qareen kale ama maamulka hay'adda kaalmada sharci ee uu ka tirsan yahay si macmiilka kaalmada sharciga loogu sii wado;

i. In uu dhiirrigeliyo, gacan-siiyo oo ka qayb-qaato geeddi-socodka hababka kale ee khilaaf xallilidda bulshada;
ii. In uu ka fogaado ku lug-yeelashada dano is-khilaafsan;
iii. In uu ilaaliyo isu-dheelitirnaanta dhinacyada khilaafku ka dhexeeyo;
iv. In uu dhawro oo ixtiraamo curfiga iyo caadooyin-dhaqameedka bulshada iyo degaanka arrinku khuseeyo
v. In uu ka qayb-qaato isu-soo-dhowaynta, isu-soo-jiidida dhinacyada is-khilaafsan;
vi. In marka uu metelayo dhinacyada qaarkood uu wada-tashi joogto ah la yeesho macmiilka uu metelayo;
vii. In uu u dhaqmo daacadnimo iyo niyad-samaan;
viii. In uu talo ka bixiyo ku-dhaqanka shuruucda iyo nuxurka sharciga, macmiilkana ku toosiyo sharciga.

## 3.6 Mas'uuliyadaha la xidhiidha talo-bixinta sharci

Qareenka kaalmo sharci oo ay waajibaadkiisa ka mid tahay talo-bixin sharci oo uu siiyo dadka nugulka ah ee aan awoodin in ay qareenno qabsadaan, marka uu adeegga talo-bixinta siinayo dadka u-qalma kaalmada sharciga, waxa waajib ku ah:

i. In uu hubiyo u xaqiijiyo in qofka uu talada sharci siinayaa uu yahay mid u qalma kaalmada sharciga;
ii. In uu dhegeysto oo fahmo mawduuca talada sharci uu ka bixinayo;
iii. In uu u sheego intaanu waraysan, talo bixintiisana ka joogsado haddii qofka talo doonka ahi yahay dhinac ka soo horjeeda dhinac uu metelayo ama dhinaca hore talo uga siiyay isla mawduucan talada loo doonayo;
iv. In uu bixiyo talo sharciga ku salaysan;
v. In uu u talo bixiyo si daacadnimo iyo niyad-samaan ah;
vi. In uu gacan-siiyo qofka u baahan talo-bixinta ka dib caawimo kale sida tilmaamid, tusid, habayn qoraal iwm;
vii. In uu ku dhiirrigeliyo qof kasta oo uu talo siinayo in uu xaqiisa u maro, ku difaacdo ama ku doono dariiq sharci ah;
viii. In uu u muujiyo ixtiraam iyo tixgelin, kana ilaaliyo wax kasta oo niyad-jebin kara qof talo sharci raadinaya;
ix. In aanu talo-bixinta kaga doonin dhaqaale, hanti ama faa'iido kale;
x. In uu taladiisa u bixiyo si madaxbanaan oo xilkasnimo ah.

# QAYBTA AFRAAD
# CAAWIYEYAASHA QAREEN EE KAALMADA SHARCI

## 4.1 Hab-dhaqamada caawiyaha qareenka kaalmo sharci

Caawiyaha qareen (Paralegal) ee kaalmo sharci waxa waajib ka saaran yahay hab-dhaqan asluubeedka halkan lagu jideeyey ee la xidhiidha kaalmada sharciga,oo ay ka mid yihiin:

## 4.2 Mas'uuliyadaha caawiyaha qareen kaalmo sharci

i. In uu ixtiraam iyo qaddarin kula dhaqmo macaamiisha adeegyada kaalmada sharciga loo qabanayo ama u baahan;
ii. In aanu fulin ama gelin hawl ama fal aanu isagu awood u lahayn;
iii. In aanu ku talin, dhiirrigelin, lugna ku yeelan fal masuqmaasuq la xidhiidha;
iv. In uu u dhaqmo daacadnimo iyo niyad-samaan, hawshiisana u guto si xilkasnimo iyo mas'uuliyadi ku dhisan tahay;
v. In qofka uu la kulmo waraysi sugan la yeesho, xaqiiqda iyo runta raadiyo, xogta lafa-guro oo macluumaad dhamaystiran, hufan oo run ah u gudbiyo qareenka;
vi. In uu ixtiraamo, dhawro oo ilaaliyo Dastuurka, Xeerarka dalka guud ahaan, gaar ahaana Xeerka Adeegga Kaalmada Sharciga, Xeer-Nidaamiyaha, hab-raacyada, hageyaasha iyo Xeer-Anshaxeedka Kaalmada Sharciga;
vii. In uu ilaaliyo oo xafido sirta macmiilka;
viii. In uu xafido, si habsami ahna u maamulo gal-dacwadeedyada iyo dhakumentiga macaamiisha;
ix. In uu ixtiraam, tixgelin iyo xaq-dhawr kula dhaqmo, xidhiidh wanaagsan iyo wada-shaqayna la yeesho hay'adaha garsoorka, sharci fulinta, qareennada adeegga kaalmada sharci iyo Unugga Kaalmada Sharciga ee Wasaaradda;
x. In uu xil gaar ah iska saaro dadka xorriyaddooda laga qaaday ee kaalmada sharciga u baahan, macluumaadkooda iyo xogtoodana sida ugu dhaqsaha badan qareenka ugu gudbiyo, si joogto ahna u xusuusiyo, macaamiishana gaar ahaan kuwa xidhan ku war-celiyo, xidhiidhna la sameeyo;
xi. In aanu ka doonin, dhiirrigelin ama ku cadaadin qofna in lagu siiyo ama loogu balan-qaado hawshiisa kaalmada sharciga darteed dhaqaale ama faa'iido kale;
xii. In uu ka fogaado dano is-khilaafsan;
xiii. In aanu ku marin-habaabin macmiilka talo bixin ama tilmaam khaldan.

## 4.3 Tallaabooyinka ka dhalan kara u hoggaansan-la'aanta waajibaadyada qaybta Afraad

Caawiyaha Qareen kaalmo sharci ee ay ku cadaato in uu u hoggaansami waayey mid ka mid ah ama ka badan waajibaadyada lagu sheegay qaybtan 4[aad], wuxuu mutaysanayaa:

# QAYBTA SHANAAD
# ANSHAX-MARIN

## 5.1 Noocyada Awoodda anshax-marinta

### b. Anshax-marin hay'adda kaalmada sharciga gudaheeda ah

Hay'ad kasta oo kaalmo sharci waxay yeelanaysaa nidaam anshax-marineed oo waafaqsan xeer-anshaxeedkan, kaas oo hawl-wadeennadeeda ay ku anshax-marinayso marka ay ku gefaan mas'uuliyadaha iyo waajibaadyada lagu dejiyey xeer-anshaxeedkan, iyagoo ka qaadaya tallaabooyinkan anshax-marin ee halkan lagu jideeyay:

### t. Anshax-marin hay'adda kaalmo sharci debeddeeda ah

Anshax-marinta hay'adaha iyo hawl-wadeennada kaalmada sharciga waxa go'aan ka gaadhaysa Guddida Ruqsad-Bixinta iyo Anshax-Marinta Qareennada marka:

i. Cabashada ama dacwadda anshax-marineed ay lid ku tahay hay'adda kaalmada sharci;
ii. Dacwadda anshax-marinta ama cabashada lidka ku ah hawl-wadeenka kaalmada sharci ay wax ka qaban weydo hay'adda kaalmada sharci ee hawl-wadeenku ka tirsan yahay;
iii. Go'aanka anshax-marineed ee hay'adda uu dhinacyada midkood ku qanci waayo;
iv. Hawl-wadeenka kaalmada sharci uu madax-banaan yahay oo aanu hay'ad kaalmo sharci u shaqayn.

## 5.2 Hab-raaca dacwadaha anshaxa

Dacwadaha, dalabka ama cabashada la xidhiidha anshax-marinta waxa loo gudbinayaa si waafaqsan 5.1(t) waxaana gudbin kara, bilaabi kara ama codsan kara in la baadho dacwad anshax Unugga Kaalmada Sharciga ee Wasaaradda Cadaaladda ama cid ku dhibban gefka anshax ee laga cabanayo, iyadoo marka dacwadda anshax lid ku tahay hay'ad kaalmo sharci oo ay ku jirto wax ka qabasho la'aanta cabasho lid ku ah hawl-wadeennadeeda oo loo gudbiyay iyo marka ay lid ku tahay Hawl-wadeenka kaalmo sharci oo madax-banaan oo aan hay'ad kaalmo sharci u shaqayn ama ka tirsanayn loo gudbinayo dacwadda Guddida Ruqsad-Bixinta iyo Anshax-Marinta Qareennada. Xaaladaha kale ee dacwaddu lidka ku tahay hawl-wadeen hay'ad kaalmo sharci ka tirsan waxa cabashada loo gudbinayaa hay'addii uu ka tirsanaa, iyadoo gudbinta dalabka, shuruudaha dalabka, hab-raaca dhegeysiga, go'aanka iyo arrimaha la xidhiidha dacwadaha anshaxa loo raacayo tilmaamaha xubnaha hoose ku qoran.

**III. Cabashada, dacwadda ama dalabka anshax-marin lid ku ah hawl-wadeen kaalmo sharci**

Cabashada, dacwadda ama dalabka anshax-marin lid ku ah hawl-wadeen kaalmo sharci, waxa soo gudbin kara Unugga Kaalmada Sharciga ee Wasaaradda, iyadoo la raacayo tilmaamaha xubinta (b)(I) ee qaybtan ama waxa soo gudbinaya qof cabanaya iyadoo la raacayo tilmaamaha xubinta (b(II) ee qaybtan;

**t. Hab-raacyada hubinta iyo dhegeysiga dacwadaha anshaxa**

Guddida Ruqsad-Bixinta iyo Anshax-Marinta Qareennada ama hay'adda kaalmo sharci ee heshay qoraal dacwad, cabasho ama dalab anshax-marin waxay awood u leeyihiin:

I. In ay deristo dacwadda, cabashada ama dalabka anshaxu in ay tahay mid la garawsan karo, iyadoo marka aan la garawsan karin ka qancinaysa cidda soo qortay;
II. In ay u gudbiso cidda ay lidka ku tahay cabashadu ama dacwaddu amaba uu dalabka lidka ku yahay, si ay u hesho jawaabta dhinaca kale;
III. In uu dib ugu yeedhi karto dhinacyada ama midkood si gaar-gaar ah ama iska-hor- keenid ah, si ay su'aalo dheeraada u sii waydiiso ama xog kale ama cadaymo uga dalbato;
IV. In ay raadin karto iskeed cadaymo ama xogo dheeraad ah si madax-bannaan;
V. In ay go'aan ku qaadan karto xogta iyo qoraallada dhinacyada.

## 5.3 Go'aanka anshax-marinta

Go'aammada anshax marintu, marka aan qaab ka duwan la waajibin, waxay noqonayaan kuwo:

b) qoraal ah, laguna caddeeyo noocyada gefefka anshaxeed ee dhacay, sababaysan, laguna xuso tallaabada anshax-marineed;
t) qeexan oo dhammaystiran, laguna caddeeyo qaabka loo fulinayo iyo qaabka loo kormeerayo ku-dhaqanka tallaabada anshax-marineed ee qofka lagu xukumay (markay lagama maarmaan tahay);
j) la gaadhsiiyo dhinacyada ay khuseeyaan, loona diiwaangeliyo cidda ay lidka ku yihiin.

## 5.4 Ka cabashada Go'aammada anshax-marinta

Go'aammada anshax-marineed waxa dhinaca danaynayaa xaq u leeyahay in uu ka cawdo, waxaanu cabashadiisa go'aanka lidka ku ah ku gudbinayaa qoraal sababaysan muddo (30) casho gudahood ah oo ka bilaabanta maalinta la gaadhsiiyay, iyadoo cabashada loo marayo si waafaqsan xubnaha soo socda:

**b. Ka-cabashada go'aammada hay'adda kaalmo sharci**

# QAYBTA LIXAAD
# QODOBBO KALA-GUUR

## 6.1. Ansixinta Xeer-anshaxeedka

b. Ansixinta Xeer-anshaxeedka waxaa lagu nidaamin doonaa Xeerka Kaalmada sharciga.

t. Ka hor intaan la soo saarin Xeerka Kaalmada Sharciga, Xeer-Anshaxeedkan waxaa ku heshiinaya adeeg bixiyeyaasha kaalmada sharciga ee hadda jira oo kala ah; Ururka Qareennada Somaliland (SOLLA), Ururka Qareennada Haweenka, xarumaha kaalmada sharciga ee Jaamacadaha Hargeysa iyo Camuud iyo weliba Unugga Kaalmada Sharciga ee Wasaaradda Cadaaladda.

j. Marka adeeg bixiyeyaasha kor ku xusan iyo Unugga Kaalmada Sharcigu isku raacaan Xeer-Anshaxeedkan, Agaasimeyaashooda kaalmada sharciga iyo madaxa Unugga ayaa wada saxeexaya, waxayna u gudbinayaan Wasiirka oo Xeer-Wasiir ku dhaqan-gelinaya.

## 6.2. Wax-ka-bedelka Xeer-anshaxeedkan

b. Ka dib marka Xeerka Kaalmadda Sharcigu dhaqan-galo, wax-ka-bedelka Xeer-Anshaxeedkan waxa loo raacayaa Xeerka Kaalmada Sharciga; laakiin ka hor dhaqan-galka Xeerka Kaalmada Sharciga, wax-ka-bedelka Xeer-Anshaxeedkan waxaa isku raacaya dhinacyadii ansixiyay.

t. Wax-ka-bedel kasta oo Xeer-Anshaxeedkan lagu sameeyaa wuxuu ku dhaqan-gelayaa Xeer-Wasiir.

## 6.3. Faafinta iyo Dhaqan-galka

b. Xeer-Anshaxeedkani wuxuu ku dhaqan-gelayaa Xeer-Wasiir ka dib marka ay saxeexaan wadaageyaasha kaalmada sharciga ee kor ku xusan;

t. Xeer-Anshaxeedka waxaa lagu faafinayaa faafinta Rasmiga ah ee Qaranka, Unugga Kaalmada Sharciga ayaa u baahinaya dhamaan daneeyeyaasha kaalmada sharciga.